# WARBIXIN XAQIIQO AH EE MIDABTAKOORKII DHACAY 9/11 KA DIB

| *OSC* | *EEOC* |
|---|---|
| Xafiiska Xeerilaaliyaha Gaarka ah ee Dhaqangelinta Shaqaaleyn ee Aanan Xaqa aheyn ee La Xiriira Imigareeshinka, Qeybta Xuquuqda Mujtamaca ee Wasaaradda Cadaaladda | Guddi Fursad Shaqaaleyn ee Loo Siman Yahay<br><br>Source: [www.eeoc.gov/facts/backlash-employee.htm](www.eeoc.gov/facts/backlash-employee.htm) |
| Xadka:<br><br><u>Ku dhaqanka mamnuucan:</u> ujeeddo hubaal ah mooyee, Xaaladda Imigareeshinka/ Muwaadinimo iyo midabtakoorka asalka qofka ee la xiriira gadashada shaqo, shaqo ka cayrinta iyo qorida qof iyo ka waasteyntaba. Baaritaanka aanan xaq ku saleysnayn ee waraaqaha shaqada (form I-9) iyo ka aargudashada.<br><br><u>Shaqaaleeyaha badbaadsan:</u> Shirkadda ey u shaqeeyaan 4 shaqaale ama in ka badan wey hoos imaanayaan, oona mamnuucaya midabtakoorka ku salaysan baaritaanka la xiriira xaaladda Imigareeshinka/Muwaadinka aanan xaq ku saleysnayn ee waraaqaha shaqada. Shirkadda ay u shaqeeyaan afar ilaa afar iyo toban shaqaale wey hoos imanayaan sharciga mamnuucaya midabtakoorka asalka qofka.<br><br><u>Qofka badbaadsan:</u> Muwaadiniinta Mareykanka iyo dadka loo ogol yahay inay shaqeeyaan wey ka shiran yihiin midabtakoorka iyo xadgudubka ku saleysan asalka qofka. Muwaadiniinta Mareykanka, dadka deganaanshaha joogtada leh, Magangalyada, qaxootiga iyo deganaanshaha kooban leh wey ka shiran yihiin midabtakoorka xaaladda Imigareeshinka/Muwaadinka. | Xadka:<br><br><u>Ku dhaqanka mamnuucan:</u> Diin, asalka qofka, nooca qofka(nin/naag), da', cuuryaanimo, uur iyo midab kala sooc ee ku wajahan dhinac walba oo shaqaalayn ah, marka lagu daro ajallo iyo shardiyo ee shaqaalaynta.<br><br><u>Shaqaaleeyaha badbaadsan</u> Shirkadaha ay u shaqeeyaan shan iyo toban ama in ka badan oo shaqaale ah.<br><br><u>Qofka badbaadsan:</u> Dadka oo dhan si walba oo ay xaaladooda imigareeshan tahay. |
| Tusaale la xiriira midabtakoor shaqaalayn<br><br><u>Midabtakoor Diimeed</u><br><br>Anwar oo ka yimid Masar, oo magangelyo u jooga ayaa shirkad howlfududaysa maaliyadda jago waydiistey. Shirkadda wey u diiday inay shaqo siiso sababtoo ah muu aha muwaadin Mareykan, muuna haysto Kaarka cagaaran (green card). Maxaa Anwar ku waajibta?<br><br>Anwar wuu u dacwoon karaa isagoo ka dacwoonaya midabtakoorka ku salaysan xaaladda Muwaadinimada/Imigareeshinka. Shaqaaleeyaha shaqo muu ugu diidi karo dadka magangelyada haysta ama qaxooti ah, sababtoo ah mey aha muwaadin Mareykan ama deganaansho joogto oo sharciyeysan, ama mey qabaan (green card), marka laga reebo marka uu sharciga ogolyahay midabtakoor muwaadinnimo waa markey noqoto xeerka ama qandaraasyada dowladda.<br><br>Shaqaaleeyeyaasha waa inay hubiyaan warqadaha shaqaalaha cusub, hadii uu yahay muwaadin iyo hadii kale. Inay buuxiyaan foom (Form I-9). qofka wuu doorbidi karaa waraaqaha sharciyeysan, ee la ogolyahay waxaa ka mid ah kaarka (Social Security)ga oo aanan xannibneyn iyo batentahaaga. Shaqaaleeyaha may ku khasbi karaan inuu keeno kaarka cagaaran (green card). qofka aanan ahayn muwaadin. | Tusaalaha midabtakoorka shaqaalayn<br><br><u>Midabtakoor diimeed</u><br><br>Narinder, oo siikh Koonfur Aasiyaan ah oo cimaamad hadaxa ku duubta (tuban), ayaa jago maqalhaaye ah ka doontay XYZ.waana loo diiday shaqo, sababtoo ah way ka baqayaan Narinder labiska diintiisa, macaamiishana mey ka helayaan. XYZ maxay arrintan ka sameeyaan?<br><br>XYZ may diidi karaan inay shaqaaleeyaan Narinder sababtana waa macaamiisha ayaanan doorbideynin dhar diimeedkan. Taasi waa sharci darro oo midabtakoor ah. Wayna la mid noqonaysaa adigoo u diiday shaqo Narinder sababtoo ah waa siikh. Waa sharci darro inaad ku isticmaasho eexasho goobaha shaqada adigoo fiirinaya diintooda, midabka ama asalka qofka. |

# WARBIXIN XAQIIQO AH EE MIDABTAKOORKII DHACAY 9/11 KA DIB

Tusaalooyinka way socdaan

Midabtakoorka  Xaaladda Imigareeshinka/ Muwaadinimo

- Shaqaaleeye ayaa daabacay calaamad ku qoran ee ah, " waannu shaqaaleymaynaa Mareykan oo keli ah".
- Shaqaaleeye ayaa diiday inay shaqaaleeyaan shaqo dalbade, sababtoo ah muu u eka muwaadin Mareykan ah.
- Shaqaaleeye ayaa cayriyay shaqaale oo aanan aheyn muwaadin Mareykan ah oona u eg ajnabi.

Midabtakoorka asalka qofka

- Shaqaaleeye ayaa diiday shaqo dalbadeyaal sababtoo ah way yihiin wayna u eg yihiin Carab ama ay ka soo jeedaan Koonfur Aasiyaan.
- Shaqaaleeye ayaa cayriyay shaqaale oo xiran safaleeti, xijaab ama cigaal (tuban),.
- Shaqaaleeye ayaa diiday inuu shaqaaleeyo qof leh af-guri (lahjad).
- Shaqaaleeye ayaa si joogto ah u isticmaala erayo caay ah markuu tilmaamayo shaqaale ku dhashay Pakistan, eena ku khasbay inuu shaqaalahaas is casilo.

Caadooyin xaqdarro ee tusmo ah

- Shaqaaleeye ayaa si aad u wayn u baaray oona diiday waraaqaha sharci ee uu keenay qof Carab Mareykan ah si uu u caddeeyo inuu xaq u leeyahay inuu ka shaqeeyo Mareykanka (Form I-9).
- Shaqaaleeye ayaa ka doonaya dadka Koonfur Aasiyaanka oo dhan inay buuxiyaan foomka (Form I-9), iyadoo aanan lagu khasbin shaqaalaha kale ee cusub.
- Shaqaaleeyaha ayaa ka doonaya shaqo dalbadaha ama shaqaalaha cusub oo u eg "Muslim" inay caddeeyaan dhalashadooda Mareykan, iyadoo shaqo dalbadeyaasha kale ay dhiiban waraaqaha sharciyeysan ee ay haystaan sida (Social Security) ama batantaha si ay u buuxiyaan foomka(Form I-9).
- Shaqaaleeye ayaa ka doonaya dadka aanan aheyn muwaadin inay la yimaadaan waraaqaha INS ama DHS inay buuxiyaan (Form I-9) inta ay u ogolaan lahaayeen inuu keeno waraaqo sharciyaysan sida (Social Security)ga oo aanan cayimnayn ama batante.

Tusaalooyinka way cocdaan

Midabtakoor diimeed

Sida shaqaalaha haysta diimaha kale, shaqaalaha Muslimka ah way u baahan yihiin waafijin sida fasax diimeed ama marka laga reebo labiska timo iyo gar jarid.

Shaqaalaha Muslimka ah ee XYZ ayaa u yimid kormeere oo eyna waydisteen inay istimaalaan qolka shirka ee ku yaal daarta ka soo horjeedda si ay ugu tukadaan. Ilaa ay ka codsadaan way isticmaali jireen goobaha ay ka shaqeeyaan. Maxey XYZ ka sameynayaan?

Marka qolka loo baahdo in lagu shiro. XYZ way diidi karaan in loo isticmaalo sababo diimeed. Inkastoo ay ogolaanshaha loo ogolaanayo shaqaalaha qolka shirka inay ku tukadaan aynan wax dhib ah u keenin XYZ iyo siyaabo kale. Siddoo kale inta badan waa la tukan karaa waqtiga biririfta, si ay u helaan waqti ku filan waqtiga shaqada wax dhib ah muu u keenayo. Hadii tukasho loo aadayo daar kale way qaadanaysaa waqti ka badan waqtiga biririfta loo qoondeeyay. Shaqaalaha weli waa loo ogolaan karaa hadii nooca shaqada ay saamaxdo. XYZ way ka waydiisan karaan shaqaalaha inay gadaal ka buuxiyaan saacadaha shaqo ay u qaateen fasaxa diimeed.

Tusaalooyinka falxumo ee goobta shaqo

Muhammad wuu u shaqeeyaa XYZ. Muhammad wuu la kulmay maamulahiisa oo uuna u andacooday in mid ka mid ah shaqaalaha uu la shaqeeyo, Bill, had iyo jeerna ugu yeero magacyo sida "geel jire", "argagixiso guri", iyo "ayatullaah" oo uuna ula kac ugu waji xumaynayo macaamiisha isagoo ku andacoonay inuusan shaqada qabanin, Muxuu ku jawaabayaa kormeeraha?

Maamulayaasha iyo kormeerayaasha oo ka warhelay dhaqanxumada isweydiinta leh ee ka jira goota shaqada eena ku wajahan diimaha ama asalka qofka ayaa mas'uul ka ah inay qaadaan  tallaabo lagu saxayo falkaas  ee shaqaalaha hoos yimaada.

Muhammad maamulahiisa waa inuu u gudbiyaa andacada Muhammad maamule munaasib ku ah hadii uunan kormeerin Bill. Hadii XYZ go'aansato in dhaqanxumadaas ay dhacdo, waa in ganaax wayn lagu ganaaxo Bill si uunan xadgudubkaas oo kale u sii soconin.

La xiriirka OSC:  Macluumaadka dheeraadka ah OSC,Marka lagu daro helitaanka foomka dacwo, booqqo www.usdoj.gov/crt/osc ama telefoone u dir nambarka shaqaalaha  bilaashka ah ee OSC 1-800-255-7688 (TDD 1-800-237-2515). Dacwada waa in la soo oogaa 180 maalmood gudaheed ee aheyd fal midabtakoorka ah.

La xiriirka EEOC:  Macluumaadka dheeraadka ah EEOC booqqo www.eeoc.gov ama telefoone u dir 1-800-669-4000 (TDD 1-800-669-6820). Dacwada waa in la soo oogaa 180 maalmood gudaheed ee aheyd fal midabtakoorka ah.